QAAMUUSKA
ARRIMAHA BULSHADA

Fiinish – Soomaali

Sosiaalialan sanakirja • suomi – somalia

Hilma
vammaisten maahanmuuttajien tukikeskus

Julkaisija:
Vammaisten maahanmuuttajien
tukikeskus Hilma
Vammaisfoorumi ry
www.tukikeskushilma.fi

Paino: Bookwell Oy, Jyväskylä

Ulkoasu ja taitto: Väinö Heinonen

Hordhac

Eray-bixintan waxaa ku jira erayo iyo eray-cilmiyeedyo la xiriira cilmiga arrimaha bulshada. Laamaha uu cilmiga arrimaha bulshadu ka kooban yahay waxaa ka mid ah shaqada naafada. Adeegyada arrimaha bulshadu bixiso waxaa iyana ka mid ah la talin iyo daryeel.

Eray-bixinta waxaa ku jira erayo iyo eray-cilmiyeedyo ay macmiisha daryeelka arrimaha bulshadu la kulmayaan. Daryeelka arrimaha bulshada waxa loola jeedaa waa adeegyada ku salaysan sharciga ee ay degmadu u qaban qaabiso dadkeeda. Macmiisha daryeelka arrimaha bulshadu waa dadka degmada deggan. Waxaa iyana jira adeegyo khaas ah oo ka mid ah adeegyada daryeelka arrimaha bulshada. Adeegyada khaaska waxaa ka mid ah adeegyada loogu talagalay dadka aad naafada u ah iyo adeegyada ah taageerada lacageed oo loogu talagalay, in lagu sugo(xaqiijiyo) inuu qofku helo dhaqaale uu ku noolaado.

Waxaa dhici karta, in erayada qaarkood af fiinish ahaan macnayaal badan leeyihiin ama erayga macnihiisu uu ku xiran yahay meesha loo isticmaalayo.
Eray-bixintan erayada ku qoran macnayaasha ay yeelan karaan oo dhan halkan kuma qorna. Eraygu macnaha kale ee uu yeelan karo halkan kuma qorna, haddii macnahaasi aanu la xiriirin cilmiga arrimaha bulshada.
Tusaale: erayga hakea macnayaal badan buu leeyahay.
Erayga hakea macnihiisu wuxuu noqon karaa: raadin ama doonid, wuxuu kaloo noqon karaa wax codsasho.

Ihminen hakee ruokaa kaupasta = Qofku dukaanka ayuu cunto ka doonayaa.

Ihminen hakee toimeentulotukea = Qofku wuxuu codsanayaa taageerada dhaqaale ee nolosha aasaasiga ah.

Eraybixintan erayga hakea macnihiisu waa dalbasho(codsasho) adeeg ama taageero kale oo laga dalbanayo(codsanayo) maamulka.

Eray-bixinta waxaa meelaha qaarkood ku jira weedho tusaalooyin ah. Sida ay u qoran yihiinna waa si loogu talagalay, inay qoraalka kale ka duwanaadaan, sida tusaalayaasha la soo dhaafayba ka muuqata.

Eray-bixintani ma aha mid eray-cilmiyeed walba si faahfaahsan loogu sharraxay. Tusaale ahaan, waxaa jira shuruudo kala duwan oo aan halkan lagu sheegin oo la xiriira taageerooyinka qaarkood. Faahfaahin dheeraad
ah waxaad ka heleysaa tusaale ahaan tilmaan bixiyayasha afka fudud ku qoran iyo internetka.

AIKA – WAKHTI, XILLI:

Wakhtigu waa saacadda ama goorta ay wax dhacayaan.

ajanvaraus – wakhti ballansasho:
Qofka macmiisha ah hore ayuu u sii ballansadaa wakhti uu kula kulmo qofka uu u baahan yahay oo telefoon buu wakhtiga ku ballansan karaa.

vastaanottoaika – wakhtiga qaabilaadda:
Wakhtiga qaabilaaddu waa wakhtiga ay qofka macmiisha ah iyo qofka shaqaalaha ah kulmaan.

Wakhtiga dhakhtarku wax qaabilayaa waa isniinta saacadda 14-15.

AMMATTI – XIRFAD, SHAQO:

Tusaale ahaan kalkaaliye caafimaad iyo nadiifiye waa xirfado shaqo.

ammattitutkinto – shahaado xirfadeed:
Shahaado xirfadeedku waa caddayn muujinaysa, inuu qofku yaqaan aqoonta xirfaddaasi u baahan tahay. Si uu u helo shahaado xirfadeed ardaygu wuxuu galaa dugsi xirfadaha lagu barto oo uu halkaas ayuu xirfad ku soo bartaa.

APU – CAAWIMO, GARGAAR:

Caawimadu waa caawin ama gargaarid.
Qofku jirro (bukaannimo) darteed ayuu caawimo u heli karaa.

avustaa – caawin:
Caawintu macneheedu waa qof ayaa caawinaya qof kale.

avuntarve – baahi caawimo:
Baahi caawimo macneheedu waa qof ayaa u baahan in laga caawiyo tusaale ahaan sida socodka.

avuntarpeen arviointi – qiimaynta baahida caawimo:
Dad shaqaale ah ayaa qiimaynaya tirada ama qiyaasta caawimo ee uu qofku u baahan yahay, tusaale ahaan si uu iskii meel u deggenaan karo.

henkilökohtainen avustaja
– caawiye shakhsi ahaaneed oo gaar u ah qofka naafada ah ,kuna caawinaya nolol maalmeedkiisa:
A personal assistant is a person who for example, helps a person with a disability in his or her daily activities, such as getting around.

apuväline – qalab caawimo:
Qalab caawimo waa qalab qofka ka caawiya tusaale ahaan socodka.

Bakooraddu ama tukubuhu waa qalab caawimo.

ASIAKAS – MACMIIL, RUKUN:
Macmiilku waa qof hela adeegyo ama alaab. Qofku markuu tego(aado) tusaale ahaan rugta caafimaadka, markaas qofku waa macmiisha rugta(xarunta) caafimaadka.

ASIAKIRJA (dokumentti) – DUKUMENTI:
Dukumentigu waa caddayn qoraal ah oo sheegeya go'aan uu maamul gaaray, ama amar la bixiyey ama arrin kale.

ASUMISAIKAVAATIMUS
– SHURUUDDA MUDDADA DEGGENAANTA WADDANKA:
Shuruudda muddada deggenaanta waddanku waa muddada ay tahay inuu qofku Finland deggenaado sdeggenaado si uu u heli karo taageerooyinka(caawimooyinka) qaarkood.
Qofka waddanka u soo guuray markuu saddex sannadood Finland deggenaado ka dib ayuu heli karaa lacagta taageerada(caawimada) naafada.

EDUSTAJA – WAKIIL:

Wakiilku waa qof loo magacaabay inuu wakiil u noqdo ilmo aan qaangaar ahayn, xilkiisuna waa inuu daryeelo ilmaha arrimihiisa ay ka mid yihiin lacagta iyo meesha uu ilmuhu ku noolyahay.

EDUNVALVOJA – DANO ILAALIYE:

Dano ilaaliye waa qof u xilsaaran, inuu ilaaliyo in qof aan isagu xuquuqdiisa ilaashan karini helo xuquuqda uu leeyahay.

ELÄKE – HAWLGAB:

Hawlgabka macnihiisu waa taageero lacageed oo qofku helo tusaale ahaan markuu shaqada ka fariisto oo hawlgab ka galo.

Hawlgabka waxaa qaata qofka aan shaqayn waayeelnimo darteed ama awooddarro shaqo darteed.

Qofku markuu shaqada ka fariisto ayuu hawlgab yahay.

työeläke – hawlgab shaqo, tarmiis:

Hawlgab shaqo waa lacag qofku shaqaynta uu shaqaynayey darteed u ururta oo markuu hawlgabka noqdo la siiyo.

työkyvyttömyyseläke
– hawlgab awoodid la'aanta shaqo:
Hawlgabka awoodid la'aanta shaqo waa lacag la siiyo qofka jirro ama naafonnimo darteed aan awoodin inuu shaqeeyo.

ELÄMÄNHALLINTA
– KA ADKAANTA AMA MAAMULIDDA NOLOSHA:
Ka adkaanta nolosha macneheedu waa qofku wuxuu awoodaa inuu noloshiisa maamulo oo saamayn ku yeesho.

ERITYISOPPILAITOS
– MACHAD WAXBARASHO KHAAS AH:
Machadka waxbarashada khaaska ah waa iskuul(dugsi) loogu talagalay ardayda taageerada(gargaarka) badan u baahan. Tusaale ahaan dhallinyarada naafada ah waxay wax ka baran karaan machaddo khaas ah oo ay ka helayaan caawimo iyo taageero.

ESTEETTÖMYYS, ESTEETÖN – XANNIBAAD LA'AAN:
Xannibaad la'aanta macneheedu waa badeecada, adeegyada iyo deegaankuba waxay u shaqeeyaan si fudud oo dadka naafada ah xitaa suuraggal bay u tahay inay isticmaalaan.

Meeshu waa xannibaad la'aan, haddii si fudud loogu mari karo tusaale ahaan kursiga curyaamiinta ee shaagaga leh.

HAKEA – CODSASHO, DALBASHO:

Codsashada macneheedu waa qof ayaa wax codsanaya, waxaasi wuxuu noqon karaa, tusaale ahaan adeeg ama taageero(gargaar).

Qofka macmiisha ah Hay'adda Hawlgabka Qaranka ayuu ka codsan karaa taageerada la qabsashada waddanka.

hakemus – codsi:

Codsigu waa dukumenti ama foom(waraaqo) uu qofku si qoraal ah wax ugu codsado, waxa la codsanayaa wuxuu noqon karaa tusaale ahaana deeg.

hakuaika – wakhtiga codsashada:

Wakhtiga codsashada macnihiisu waa wakhtiga ay tahay in codsiga meel la geeyo, tusaale ahaan iyada oo boostada lagu dirayo.

Codsiga waa in la keenaa maalinta wakhtiga codsasahda ugu dambaysa saacaddu intaanay gaarin 4-ta galabnimo.

hakulomake – foomka codsiga:
Foomka codsigu waa foom uu qofku si qoraal ah ugu codsado tusaale ahaan adeeg ama taageero.

Qofka macaamiisha ah foomka codsiga ayuu ku dalbanayaa taageero.

HARKINTA – KA FEKERID:
Ka fekeridda macneheedu waa qiimayn, taas oo ah in arrin laga fekerayo.

Qofku wuxuu ka fekerayaa waxa uu rabo inuu barto.

harkinnanvarainen palvelu
– adeeg ka fekerid ku xiran:
Adeegga ka fekeridda ku xiran macnihiisu waa qof walba adeegga ma heli karo.
Shaqaalaha ayaa qiimeeya oo go'aan ka gaara, inuu qofku adeegga u baahan yahay, tusaale ahaan baxnaanin.

HOITOSUUNNITELMA – QORSHE DARYEEL:
Qorshaha daryeelku waa qorshe ay dad xirfad yaqaanno ah u sameeyaan qofka daryeelka u baahan, tusaale ahaan jirro darteed.
Qorshaha waxaa la sameeyaa iyadoo la eegayo qofka xaaladiisa iyo astaamaha cudurka.

HUOLTAJA – WAALID:
Waalidku waa qofka u xilsaaran ilmo aan qaangaar ahayn daryeelkiisa, barbaarintiisa, ilaalintiisa iyo dhaqaalayntiisa.

HYVÄKSIKÄYTTÖ – KA FAA'IIDAYSASHO, ISTICMAALID:
Ka faa'iidaysashada macneheedu waa qof ayaa jagadiisa si khalad ah u isticmaala oo tusaale ahaan qof kale ayuu wax xun ku sameeyaa.

HÄIRINTÄ – DHIBID:
Dhibidda macneheedu waa qofka wax dhibayaa si joogto ah ayuu qofka kale si khalad ah ugula dhaqmaa, tusaale ahaan isaga oo liidaya(quudhsanaya,yasaya) ama dhaawacaya. Qofku wuxuu qof kale u dhaawici karaa isagoo hadal xun ku yiraahda ama isagoo wax xun ku sameeya.

IHMISOIKEUDET – XUQUUQAHA BINI AADAN:
Xuquuqaha bini aadanku waa xuquuqo guud oo qof waliba leeyahay. Tusaale ahaan xornimada hadalku waa xuquuq noocaas ah.

ITSEMÄÄRÄÄMISOIKEUS, ITSENÄISYYS
– XAQA MADAXBANNAANI, XORNIMO:

Xaqa madaxbannaanida macneheedu waa in qofku xor u yahay noloshiisa oo uu isagu wuxuu rabo dooranayo. Xornimada macneheedu waa in qofku aanu dadka kale ku xirnayn oo uu iskiis si madaxbannaani leh go'aan u gaari karo.

JÄRJESTÖ – URUR:

Ururka macnihiisu waa beel bulsho ay ka tirsanaan karaan dad ama beelo kale. Ururku wuxuu leeyahay ujeeddo uu darteed wax u qabto.

Ururka Dhexe ee Naafada Araggu waa urur horumar ku sameeya danaha dadka naafada ah.

KELA – KELA:

Kela waa magaca Hay'adda Hawlgabka Qaranka oo la soo gaabiyey. *Hay'addaasi* waxay qaabilsan tahay daryeelka aasaasiga ah ee dadka Finland ku nool ee ku jira xaaladaha nolosha ee kala duduwan.
Kela waxay bixisaa taageerooyin dhaqaale oo kala duduwan, sida lacagta carruurta.

KOTOUTUMINEN – LA QABSASHADA WADDANKA:

La qabsashada waddanka macneheedu waa qofka waddanka u soo guuray ayaa la qabsanaya beesha iyo deegaanka cusub ee uu yimi. Ujeeddada la qabsashada waddanka laga leeyahay waa in qofka waddanka u soo guurey si fiican wax ula qabsan karo dadka kale ee bulshada dhexdeeda. Hadafka la qabsashada waddanku waa tusaale ahaan, in qofka waddanka u soo guuray barto afka cusub iyo deegaanka cusub iyo inuu shaqo helo.

kotoutumissuunnitelma
– qorshaha la qabsashada waddanka:
Shaqaalaha masuulka ah iyo qofka macaamiisha ah ayaa si wadajir ah u samaynaya qorshe qofka ka caawinaya siduu waddanka ula qabsan lahaa oo u fahmi lahaa deegaanka cusub. Qorshuhu waxyaabaha uu ka kooban yahay waxaa ka mid noqon kara tusaale ahaan koorso af finish ah ama tababar shaqo.

kotoutumistuki
– taageerada la qabsashada waddanka:
Taageerada la qabsashada waddanku waa lacag qofka waddanka u soo guuray la siiyo muddada qorshaysan ee la qabsashada waddanka.

KULJETUSPALVELU – ADEEGGA GAADIIDKA:

Adeegga gaadiidka waxaa loola jeedaa qofka macaamiisha ah gaadiid ayaa loo qabanqaabiyaa, haddii aanu isticmaali karin gaadiidka dadweynaha.

Qofka aad naafada u ah wuxuu heli karaa gaadiid uu ku tago shaqada ama waxbarashada oo tusaale ahaan taksi buu raaci karaa.

KUNTA – DEGMO:

Degmo waxaa loola jeedaa dhul ay dad deggan yihiin. Degmo wuxuu kale oo macneheedu yahay maamulka adeegyada u qabanqaabiya dadka degmada deggan. Qof walba oo finish ah degmo ayuu deggan yahay oo qof walba degmo ayuu ka tirsan yahay.
Degmadu waxay xitaa ahaan kartaa magaalo.

Degmada laga tirsan yahay waa degmada uu qofku si joogto ah u deggan yahay.

KUNTOUTUMINEN – BAXNAANNOOBID:

Baxnaannoobidda waxaa loola jeedaa qofku wuxuu helayaa habab uu kaga gudbo xaaladda adag ee nolosha.
Iyadoo baxnaaninta la adeegsanayo ayuu qofku heli karaa tamar ama awood oo wuu shaqaysan karaa.

KUNTOUTUS – BAXNAANIN:

Baxnaaninta ujeeddadeedu waa in waxyaabo badan la hagaajiyo, sida in uu qofku fiicnaado, inuu si madaxbannaani leh u noolaado iyo inuu shaqaysan karo. BAxnaanintu waa waxqabad la hagayo. Baxnaanintu waxay ahaan kartaa tusaale ahaan waxbarasho qofka ka caawinaysa inuu barto sida shaqada loo raadsado.

kuntoutussuunnitelma – qorshaha baxnaaninta:

Qof walba oo macaamiisha baxnaaninta ah waxaa loo sameeyaa qorshe u gaar ah. Qorshaha waxaa ku qoran adeegyada uu qofku u baahan yahay. Qorshuhu waxyaabaha uu ka kooban yahay waxaa ka mid ah, tusaale ahaan hagid qofka ka caawinaysa inuu ku fillaado hawlaha maalin walba jira.

LAKI – SHARCI:

Sharcigu waa amar baarlamaanku bixiyey oo shaqaalaha maamulka oo dhan iyo qof walba oo Finland ku nool ay waajib ku tahay inuu ku dhaqmo. Sharcigu wuxuu sheegi karaa tusaale ahaan cidda xuquuq u yeelanaysa adeegyada qaarkood ama noocyada adeegyada ah ee ay tahay inay degmadu u qaban qaabiso tusaale ahaan dadka waddanka u soo guurey.

Sharciga la qabsashada waddanku wuxuu horumariyaa dadka waddanka u soo guuray la qabsashadooda waddanka,sinnaanta iyo madaxbannaanida wax kala doorashada.

lakisääteinen – sharci ku salaysan:
Sharci ku salaysan macneheedu waa tusaale ahaan adeegga ama taageeradu waxay ku salaysan tahay ama ku fadhidaa sharciga, shaqaalaha maamulka iyo dadka oo dhanna waa inay sharcigaas dhowraan(ilaaliyaan).

Tusaale ahaan fasaxa sannadku sharciga ayuu ku salaysan yahay oo sharciga ayaa dhigaya in qofka shaqaalaha ah bil walba oo uu shaqeeyaba shaqaysanayo fasax.

LÄHESTYMISKIELTO – DIIDMO U SOO DHAWAANSHO:
Qofku lama soo xiriiri karo umana soo dhawaan karo qofka kale, haddii booliska ama maxkamaddu ay ku xukuntay diidmo u soo dhawaansho la'aan noocaas ah.

LÄÄKÄRINTODISTUS – CADDAYN DHAKHTAR:
Caddaynta dhakhtarku waa warqad (xaashi)uu dhakhar qoro oo caddaynaysa, in qofku xanuun qabo ama uu dhaawac leeyahay.

Haddii qofku shaqada ka maqnaado tusaale ahaan qandho(xummad) darteed, waa inuu shaqa-bixiyaha u keenaa caddayn dhakhtar.

MAKSU – LACAG BIXIN:

Lacagta la bixinayo waxaa loola jeedaa kharashka qofka macaamiisha ah uu ka bixinayo badeecada ama adeegga uu isticmaalayo.

Dadka 18 sano ka weyn lacag bay ka bixiyaan daryeelka ilkaha ee xarunta caafimaadka. Qofka macaamiisha ah isagaa iska bixiya kharashka.

maksusitoumus – cahdi kharash bixineed(boono): Boonadu waa warqad caddeyn ah (dukumenti) oo cidda adeegga qabanqaabisaa siiso qofka macaamiisha ah. Cidda adeegga qabanqaabisaa waxay ballan qaadeysaa, inay adeegga kharashkiisa bixinayso. Qofka macaamiisha ahi kharashka inuu bixiyo uma baahna.

Degmada ayaa qofka siinaysa boono uu ku helo baxnaano.

MASENNUS – NIYADJAB:

Niyadjabku waa cudur dhimirka ah.
Astaamihiisu sida caadiga ah waa niyadda qofka oo muddo dheer hoos u dhacsanaata. Niyadjabka waxaa keeni kara, tusaale ahaan xaalad nololeed adag.

MIELENTERVEYS – CAAFIMAADKA MASKAXDA:

Caafimaadka maskaxda macnihiisu waa wanaagga nafsadda. Qofku markuu xaalad fiican ku sugan yahay wuxuu awoodaa, inuu noloshiisa saamayn ku yeesho oo kari karo inuu is-daryeelo.

mielenterveystyö – shaqada caafimaadka maskaxda:

Shaqada caafimaadka maskaxdu waa adeegyo lagu daryeelo caafimaadka maskaxda ee dadka.
Dad xirfad-yaqaanno ah ayaa waxay qabtaan shaqo lagaga hortago dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda. Shaqada caafimaadka maskaxda waxaa ka mid ah daryeel iyo baxnaanin, haddii tusaale ahaan qofka uu ku dhaco xanuunka niyadjabku.

MONIAMMATILLISUUS

– XIRFAD-YAQAANNIMO BADAN:

Xirfad-yaqaannimo badan waa wada shaqayn ay sameeyaan shaqaale xirfado kala duwan yaqaanna. Tusaale ahaan iskuulka waxaa wada shaqayn samayn kara macallin, kalkaaliye caafimaad iyo shaqaalaha iskuulka u qaabilsan arrimaha bulshada.

MONIKULTTUURISUUS, MONIKULTTUURINEN

– DHAQAMO BADNAAN, DHAQAMO BADAN:

Dhaqamo badnaantu macneheedu waa kulanka iyo wax isweydaarsiga dhexmara dhaqamo kala duwan. Qof waliba dhaqankiisa ayuu wakiil u yahay. Waxyaabaha dhaqanka ku jira waxaa ka mid caadooyinka iyo afka hooyo ee qofku ku hadlo. Qofku markuu la kulmo qof dhaqan kale metelaya ama leh, waxaa dhalanaysa xaalad ah wax isweydaarsi dhaqamo kala duwan oo ay labada qofba dhaqamadoodu ku jiraan.

Dhaqamo badnaantu waxay caawisaa inuu qofku si fiican u fahmo dhaqamada kale iyo adduunkaba.

NEUVO – TALO:

Talada macneheedu waa tilmaan qofka ka caawisa inuu garto tusaale ahaan siduu wax u samayn lahaa markay xaaladi jirto.

Waalidku cid bay weydiin karaan talo ku saabsan sida ilmaha yar loo daryeelo.

neuvoa – la talin:

La talinta macneheedu waa qof ayaa cid tilmaan siinayaa.

Kalkaalisada caafimaadka ayaa waalidka kala talisa sida ilmaha yar loo daryeelo.

neuvola – rugta la talinta caafimaadka:

Rugta la talinta caafimaadku waa adeeg daryeelka caafimaadka ah oo dadku ka helaan talooyin iyo tilmaamo. Rugta daryeelka caafimaadka carruurtu waxay la socotaa caafimaadka iyo horumarka ilmaha. Waxaana laga helaa talooyin ku saabsan daryeelka ilmaha iyo waalidnimada. Rugta la talinta qoysasku waxay caawisaa qoysaska ku sugan xaalado adag, tusaale ahaan markay waalidku is furayaan.

OIKEUS – XUQUUQ:

Xuquuqda macneheedu waa oggolaansho iyo fursado qof walba leeyahay, tusaale ahaan maadaama ay Finland deggan yihiin.

Finland qof walba xaq buu u leeyahay inuu wax barto.

perusoikeudet – xuquuqaha aasaasiga ah:

Xuquuqaha aasaasiga ah waa kuwo qof walba xaq u leeyahay, waxayna ku qoran yihiin dastuurka.

Finland qof walba xaq buu u leeyahay afkiisa iyo dhaqankiisa.

subjektiivinen oikeus – xuquuq shuruud ku xiran:

Xuquuqda shuruudda ku xiran macneheedu waa qofku wuu heli adeegyo ama taageerooyin, haddii uu soo buuxiyo shuruudaha lagu heli karo.

Qofka aad naafada u ah wuxuu xaq u leeyahay caawimo shakhsi ahaaneed oo uu ku helo guriga iyo guriga debediisaba(bannaankiisaba).

ihmisoikeudet – xuquuqaha bini aadanka:
Xuquuqaha bini aadanku waa xuquuqaha dadka oo dhan ka siman yihiin ee lagu caddeeyey heshiisyada iyo dhawaaqyada caalamiga ah. Xuquuqaha bini aadanku waa xuquuqo qof walba leeyahay meel walba oo adduunka ka mid ah.
Xuquuqaha bini aadanka waxaa ka mid ah tusaale ahaan inuu qofku xaq u leeyahay afkiisa iyo dhaqankiisa iyo inuu hadalka xor u yahay.

Dadka oo dhan xaq bay u leeyihiin inay fikraddooda sheegaan.

OIRE – CALAAMAD CUDURKA:
Calaamad cudur waa astaan cudur muujinaysa oo u muuqata tusaale ahaan si jir ahaaneed.

Calaamadaha hargabku waa duuf iyo cuno xanuun.

OMAINEN – EHEL:
Ehelku waa qof isku qoys la yahay ama qaraabo dhow ah.

omaishoitaja – ehel daryeele:
Ehel daryeele waa qof guriga ku daryeela qof ehelkiisa ama qaraabo dhow ah. Ehel daryeeluhu waa inuu degmada la galaa heshiis ku saabsan daryeelidda.

omaishoitosopimus – heshiiska ehel daryeelidda:
Ehel daryeelaha iyo degmadu waxay galaan heshiis ah inuu qofku guriga ku daryeelo qof ehelkiisa ah.

omaishoidon tuki – taageerada daryeelidda ehelka:
Qofka ehelka ah ee uu daryeelo darteed ayaa ehel daryeelaha lagu siiyaa taageerada daryeelidda ehelka. Taageeradu waa mushaharka ehel daryeelidda oo lacag ah iyo maalmo fasax ah.
Taageerada waxaa iyana ka mid ah adeegyada la siiyo qofka la daryeelo, sida baxnaaninta.

PALVELU – ADEEG:
Adeegga waxaa loola jeedaa caawimada uu qofku heli karo ee ah tusaale ahaan xagga nolosha ama socodka. Ujeeddada adeegyadu waa in dadka la caawiyo si ay nolol madaxbannaani leh ugu noolaadaan oo ay uga qayb qaataan hawlaha bulshada.
Qofku adeegyada wuxuu ka dalban(codsan) karaa, tusaale ahaan degmada.

Qofka aad naafada u ahi wuxuu heli karaa adeeg gaadiid, si uu shaqada ama waxbarashada u tegi karo.

palvelujärjestelmä – nidaamka adeegyada:
Nidaamka adeegyada macnihiisu waa dhammaan adeegyada ay degmadu ama waddanku siiyaan dadka.

palveluohjaus – hagidda adeegga:
Shaqaalaha maamulka ayaa soo ururiya wararka ku saabsan adeegyada iyo taageerooyinka uu qofka macaamiisha ahi heli karo.
Shaqaalaha maamulku wuxuu kaloo qofka macaamiisha ah siiyaa talooyin ku saabsan sida adeegyada loo dalbado iyo sida loo adeegsado.

palvelusuunnitelma – qorshaha adeegga:
Shaqaalaha maamulka iyo qofka macaamiisha ah ayaa wadajir u sameeya qorshe adeeg.
Qorshahaas waxaa lagu qoraa adeegyada iyo taageerooyinka uu qofka macaamiisha ahi u baahan yahay, si waxyaabaha nolosha caadiga ah isaga debberi karo ama iskii u qabsan karo. Qorshaha marka la samaynayo waxaa la tixgeliyaa xaalad nololeedka qofka macaamiisha ah iyo waxyaabaha uu qofku rabo.

PERHETYÖ – SHAQO-QOYS:
Shaqo-qoyska macneheedu waa dad xirfadyaqaanno ah ayaa qoyska ka taageera oo ka caawiya arrimaha la xiriira tusaale ahaan barbaarinta carruurta iyo nolosha caadiga ah ee qoyska. Hadafka ama ujeedadashaqada-qoysasku waa tusaale ahaan in waalidka laga caawiyo sida nolosha caadiga ah uga adkaan lahaayeen.

PERUSHOITO – DARYEEL AASAASI AH:
Daryeelka aasaasiga ah waa daryeelka lagaga taxaderayo baahida aasaasiga ah ee bukaanka, sida nadaafadda iyo cuntaynta.

PSYKOLOGI – CILMI-NAFSI-YAQAAN:
Cilmi-nafsi-yaqaanku waa qof xirfadle ah oo caawiya, hagana markuu qofku iskiis u falanqayn kari waayo arrimaha adag.
Cilmi-nafsi-yaqaannadu waxay ka shaqeeyaan tusaale ahaan xarumaha caafimaadka, iskuullada iyo rugaha la talinta.
Cilmi-nafsi-yaqaanka xarunta caafimaadka ayaa caawiya bukaannada ku jira xaaladaha adag ee nolosha.

PSYKIATRI – DHAKHTARKA CUDURADA MASKAXDA:
Saykaaterigu waa dhakhtar khaas ah oo ku takhasusay cudurada maskaxda. Haddii qofka bukaanka ah uu hayo niyadjab, dhakhtarka dhimirka ayaa u qori karaa tusaale ahaan daawooyin.

PÄIHDE – MAANDOORIYE:
Maandooriyuhu waa walax mukhaadaraad ah. Maandooriyayaal waxaa tusaale ahaan ka mid ah khamriga iyo daroogooyinka.

päihdehuolto – ka daryeelidda maandooriye:
Ka daryeelidda maandooriye waa adeegyada la isku dayo in lagaga hortago dhibaatooyinka waxyaabaha maandooriyayaasha ahi keenaan.
Ka daryeelidda maandooriyaha hadafka laga leeyahay waa in la caawiyo dadka sida khaladka ah u isticmaala maandooriyayaasha. Sidaas oo kale ehelkooduna caawimo ayey helaan.

päihdetyö
– la shaqaynta maandooriye isticmaalayaasha:
La shaqaynta maandooriye isticmaalayaasha macneheedu waa dad xirfadleyaal ah ayaa siyaabo badan horumar ugu sameeya siday dadku u heli lahaayeen nolol wanaagsan oo caafimaad leh oo aan maandooriye la xiriirin.
La shaqaynta maandooriye isticmaalayaasha waxaa ka mid ah daryeel iyo baxnaanin la siiyo maandooriye isticmaalayaasha.

PÄIVÄHOITO – XANNAANO MAALMEED:

Xannaano maalmeedka macneheedu waa waalidku ilmaha waxaa la geeyaa meel lagu hayo intay waalidku shaqada ku maqan yihiin.

Deegaan nabadgelyo leh ayuu ilmuhu ku helayaa hayn, barbaarin iyo waxbarasho.

päiväkoti – xannaano:

Xannaanadu waa meel ilmaha lagu hayo. Ilmuhu intuu xannaanada joogo waxaa la siiyaa barbaarinta hore ama waxbarashada hore.

PÄTEVYYS – AQOONTA LOO BAAHAN YAHAY:

Aqoonta loo baahan yahay macneheedu waa shahaado ay tahay inuu qofku haysto si uu u qaban karo shaqo xirfad u baahan. Aqoonta loo baahan yahay waxaa lagu heli karaa tababar waxbarasho oo la soo qaato ama iyadoo shaqooyin la soo qabto.

Kalkaaliyaha caafimaadku wuxuu ka soo qalin jebiyaa dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha, sidaas ayuuna ku helaa aqoonta loo baahan yahay si uu kalkaaliye caafimaad ugu shaqayn karo.

RESEPTI

– WARQADDA DAAWADA EE DHAKHTARKU QORAY:
Rijeetadu waa warqad uu dhakhtarku ku qoro daawada uu qofka u qorayo.

Qofka macaamiisha ah markuu warqadan tuso ayuu farmashiyaha ka iibsan karaa daawooyinka.

ROKOTE – TALLAAL:
Tallaalku waa maaddo daawo ah oo qofka ka difaacda cudurka. Qofku inuu cudurka qaado ayuu tallaalku ka celiyaa ama ka hor tagaa.

Rugta daryeelka caafimaadka carruurta ayaa ilmaha lagaga tallaalaa tusaale ahaan burunkiitada.

RUOKAVALIO – NOOCYO CUNTO AH:
Noocyada cuntada ah waxaa loola jeedaa waxyaabaha ay ka samaysan yihiin cuntooyinka uu qofku maalin walba cuno.

Noocyada cuntooyinka ee caafimaadka leh waa kuwo isugu jira cuntooyin kala duduwan.

erityisruokavalio – cunto khaas ah:
Cuntada khaaska ah waxaa loola jeedaa cuntooyinka uu qofku cuno waxaa ka maqan maaddo cunto ah oo aanu qofku cuni karin allerjig ama jirro darteed.

Haddii qofku leeyahay cilladda kelyakiga ma cuni karo qaar ka mid ah cuntooyinka firileyda ah, kuwaas oo ah qamadiga, ruiska iyo ohraha.

allergia – allerjig, xasaasiyad:
Allerjiga macnihiisu waa maaddooyinka cuntooyinka ku jira qaar ka mid ah ayaa qofka u keena calaamado jirro sidaas darteed maaddooyinkaas ma cuni karo.

Qofka allerjig buu ku yahay ukunta digaagga.

SAAVUTETTAVUUS – HELITAAN:
Helitaanka macnihiisu waa badeecada ama adeegga adeegsigoodu waa fudud yahay oo isticimaalayaasha oo dhan way u siman yihiin.
Tusaale ahaan boggagga internetka ee afka fudud ku qoran way fudud yihiin in la akhristo oo la isticimaalo.

SAIRAUS – JIRRO, CUDUR:
Jirradu waa cudur.

muistisairaus – jirro xusuusta wax u dhinta:
Jirrada xusuusta wax u dhintaa waa cudur xusuusta hoos u dhiga. Qofku hadduu qabo jirro xusuusta wax u dhinta, waxaa ku adkaata inuu wax xusuusto oo qabsado danihiisa nolosha ee maalin walba jira. Badanaa qofku markuu gaboobo(duqoobo) ayuu yeeshaa jirrada(cudurka) xusuusta wax u dhinta.

pitkäaikaissairaus – jirro wakhti dheer ah:
Jirrada(cudurka) wakhtiga dheer ah macneheedu waa jirradu waa mid joogto ah oo qofka wakhti dheer haysa. Tusaale ahaan cudurka sonkortu waa jirro wakhti dheer ah.

SALASSAPITOVELVOLLISUUS
– WAAJIBAADKA AH IN SIRTA LA ILAALIYO:
Waajibaadka ah in sirta la ilaayo macnihiisu waa; maamulka waxaa waajib ku ah in aanay qofka wararkiisa u sheegin dad kale ama cid kale.

SELKOKIELI – AF FUDUD:

Afka fudud waa af ay fududdahay(dhib yar tahay) in la fahmo. Waxaana la isticmaalaa weedho gaagaaban iyo erayo la yaqaan. Afka fudud waxaa loogu talagalay dadka ay ku adag tahay inay fahmaan ama akhriyaan afka caadiga ah. Tusaale ahaan boggagga internetka ama qoraalladu waxay noqon karaan kuwo ah af fudud.

Qoraallada afka fudud ah ee Hay'adda Hawlgabka Qaranka – Kela waxaa ku qoran warar si kooban oo cad uga warramaya noocyada dhaqaalaha ee Kela bixiso.

SOSIAALIHUOLTO, SOSIAALITOIMI – DARYEELKA ARRIMAHA BULSHADA, WAAXDA ARRIMAHA BULSHADA:

Daryeelka arrimaha bulshada waxaa loola jeedaa waa waxqabad bulsho oo loogu talaggalay in lagu sugo in dadka Finland deggan helaan dhaqaale aasaasi ah oo ay ku noolaadaan.

Daryeelka arrimaha bulshadu wuxuu dadka u qabanqaabiyaa adeegyada arrimaha bulshada.

Daryeelka arrimaha bulshada waxyaabaha ka midka ah waxaa ku jira adeegyada loogu talagalay dadka naafada ah.

Adeegyada daryeelka arrimaha bulshadu waa kuwo sharciga ku salaysan, qabanqaabintoodana waxaa u xilsaaran degmooyinka.

Helsinki daryeelka arrimaha bulshada waxaa qabanqaabiya waaxda arrimaha bulshada ee magaalada Helsinki.

Waaxdaas ayaana u xilsaaran tusaale ahaan qabanqaabinta xannaano maalmeedka carruurta.

sosiaalipalvelu – adeegga arrimaha bulshada:
Adeegga arrimaha bulshadu waa adeegga hoos yimaada daryeelka arrimaha bulshada. Ujeeddada adeegyada laga leeyahay waa in dadku nolol fiican helaan oo ay iska debberaan ama ugu filan waxyaabaha nolosha caadiga ah ee maalin walba jira. Adeegyada arrimaha bulshada ayaa lagaga hortagaa oo wax lagaga qabtaa tusaale ahaan baahiyaha shaqo la'aanta iyo dhaqaale la'aantu keenaan. Adeegyadu waxay noqon karaan, tusaale ahaan hagid iyo talosiin.

Adeegyada la qabsashada waddanka ee waddanka u soo guurayaasha la siiyaa waa adeegyo arrimaha bulshada ah.

sosiaaliturva
– sugidda dhaqaale ee arrimaha bulshada:
Sugidda dhaqaale ee arrimaha bulshada macneheedu waa inay dadku xaalad walba oo ay ku jiraan helaan dhaqaale ay ku noolaadaan iyo daryeel. Xaq u yeelashada sugidda(hagaajinta) dhaqaalaha ee arrimaha bulshada waxaa Finland sal u ah inuu qofku si joogto ah Finland u deggan yahay ama uu Finland ka shaqeeyo. Tusaale ahaan qofka degmada deggan xaq buu u leeyahay adeegyada arrimaha bulshada.

sosiaaliasiamies
– ilaaliyaha danaha macaamiisha arrimaha bulshada:
Ilaaliyaha danaha macaamiisha arrimaha bulshadu waa qof xirfadle ah oo degmada u shaqeeya oo la taliya macaamiisha daryeelka arrimaha bulshada, macaamiishaas oo ah dadka isticmaala adeegyada daryeelka arrimaha bulshada.
Ilaaliyaha danaha macaamiisha arrimaha bulshadu tusaale ahaan qofka macaamiisha ah ayuu caawin karaa, haddii qofka macaamiisha ah aanu ku qancin sida loola dhaqmay.

sosiaalityö – shaqo sooshal:
Shaqo sooshalku waa shaqo ujeeddada laga leeyahay tahay, in la taageero siday nolosha bulshadu u noqon lahayd nolol wanaagsan iyo in la sii fiicnaysiiyo xaaladaha nolosha ee bulshada.
Xirfad-yaqaannada shaqo sooshalka qabtaa waxay caawiyaan dadka ku jira xaaladaha adag ee nolosha.

SYRJIÄ, SYRJINTÄ – TARKOORID, TAKOORIDDA:
Takooridda macneheedu waa qof ayaa si caddaalad darro ah ula dhaqma qof kale, tusaale ahaan qofka diintiisa ama naafo uu yahay darteed.

Shaqa-bixiyuhu qofka shaqada soo dalbada uma takoori karo tusaale ahaan luuqadda ama lab iyo dheddig midkuu yahay dartood.

SYRJÄYTYÄ – NOLOSHA KA DHICID:
Nolosha ka dhicidda macneheedu waa qofku wuxuu ka dhacayaa nolosha bulshada.
Tusaale ahaan qofka shaqo la'aanta ah wuxuu halis u yahay, inuu nolosha ka dhaco.

SÄÄNNÖLLINEN – JOOGTO AH:

Joogto ah macneheedu waa wax badanaa soo noqnoqda ama wakhtiyo muddo go'an u dhaxayso dhaca.

Dadku maalin walba way shaqo tagaan.
Shirarka waxaa la qabtaa sannadkiiba laba mar.

TASA-ARVO – SINNAAN:

Sinnaanta macneheedu waa dadka oo dhan waxay leeyihiin xuquuq isku mid, waana isku qiimo.

Joogta shaqada shaqaaluhu way siman yihiin. Lamana oggola in siyaabo xuquuq ahaan kala duwan loo kala saaro iyadoo sabab looga dhigayo da'da ama lab ama dheddig ay yihiin dartood.

TERAPIA – TERABI:

Terabigu waa nooc daryeel ah oo dad xirfadyaqaanno ah ay siiyaan qof jirro ama naafo darteed loo daaweynayo. Terabiga tusaale ahaan bukaanka iyo xirfadyaqaanka ayaa ka wadahadlaya dhibaatooyinka qofka bukaanka ah haysta.

seksuaaliterapia
– terabiga galmoodka ama sekshiwaalka:
Terabiga sekshiwaalku waa terabi qofka lagaga daryeelayo dhibaatooyinka la xiriira noloshiisa sekshiwaalka iyo nolosha dareenka.

toimintaterapia – terabiga waxqabadka:
Terabiga waxqabadku waa terabi hadafka laga leeyahay yahay in qofka lagu taageero si uu waxyaabaha nolol maalmeedka caadiga ah iskiis si madaxbannaani leh isugu fillaado.

fysioterapia – terabiga jirka:
Terabiga jirku waa baxnaanin kobcinaysa ama hoos u dhaca ka ilaalinaysa xubnaha jirka awoodooda dhaqdhaqaaqa iyo waxqabadka.

kriisiterapia
– terabiga dhibka degdega ah wax looga qabto:
Terabiga dhibka degdega ah wax looga qabtaa waa terabi lagu taageero qofka ku jira dhib degdeg ah xaalad tarawma ah.

TOIMINTAKYKY – KARTI WAXQABAD:
Kartida waxqabadku waa sida uu qofku u awoodo inuu isu daryeelo oo uga adag yahay shaqada iyo wakhtiga firaaqada ah.

psyykkinen toimintakyky
– kartida waxqabadka maskax ahaaneed:
Kartida waxqabadka maskax ahaaneed waa sida uu qofku u awoodo inuu isu daryeelo oo tusaale ahaan shaqada uga soo bixi karo.

fyysinen toimintakyky
– kartida waxqabadka jir ahaaneed:
Kartida waxqabadka jirku waa sida uu jirku dhaqdhaqaaqa u sameeyo iyo sida uu u shaqeeyo.

toimintarajoite – waxqabad aan dhammays tirnayn:
Waxqabadka aan dhammayska tirnayn macnihiisu waa qofka waxaa dhib ku ah inuu dhaqdhaqaaq sameeyo ama jirkiisa dhaqaajiyo.

TYÖ – SHAQO:
Shaqadu waa hawsha uu qofka shaqaalaha ah qabto ee mushaharka lagu siiyo.

tuettu työllistyminen – shaqaaloobid la taageeray:
Shaqaaloobidda la taageeray macneheedu waa qofka shaqaalaha ahi meel shaqo oo caadi ah ayuu ka shaqaynayaa. Waxaase shaqada qabashadeeda iyo arrimaha goobta shaqada la xiriira ka caawiya tababbare shaqo.

työvoimakoulutus
– waxbarashada xoogga shaqaalaha:
Waxbarashada xoogga shaqaaluhu waa waxbarasho uu qofku ku ilaashanayo aqoontiisa xirfadeed, kuna baranayo waxyaabo cusub oo ah aqoonta nolosha shaqada looga baahan yahay.
Waxbarashada xoogga shaqaalaha waxaa loogu talagalay dadka da'da shaqada ku jira iyo dadka shaqo la'aanta ah ee shaqada raadinaya, si ay nolosha shaqada u galaan.

työkyky – shaqo awoodid:
Shaqo awoodidda macneheedu waa qofku wuxuu awoodaa oo kari karaa inuu shaqadiisa qabto isagoo awoodiisa adeegsanaya.

työharjoittelu – tababbar shaqo:
Qofka shaqaalaha ah shaqada sida loo qabto ayuu tababbar ku samaynayaa, wuxuuna la qabsanayaa nolosha shaqada oo aqoontiisa xirfadeed ayuu kor u sii qaadayaa.

työvalmentaja – tababbare shaqo:
Tababbaraha shaqo waa qof xirfadyaqaan ah oo caawiya dadka ay ku adag tahay, inay shaqo helaan.

TOIMEENTULO

– SUGIDDA(HAGAAJINTA) DHAQAALAHA NOLOSHA:
Sugidda(hagaajinta) dhaqaalaha noloshu waa taageero ka mid ah sugidda(hagaajinta) dhaqaale ee arrimaha bulshada.
Ujeeddada laga leeyahayna waa in la hubsado inuu qofku helo lacag ugu filan waxyaabaha lagama maarmaanka ah, haddii dakhliga kale ee soo galaa ay yar yihiin.

toimeentuloturva – sugidda dhaqaalaha nolosha:
Sugidda(hagaajinta) dhaqaalaha noloshu waa taageero ka mid ah sugidda(hagaajinta) dhaqaale ee arrimaha bulshada.
Ujeeddada laga leeyahayna waa in la hubsado inuu qofku helo lacag ugu filan waxyaabaha lagama maarmaanka ah, haddii dakhliga kale ee soo galaa ay yar yihiin.

toimeentulotuki
– taageerada dhaqaale ee nolosha aasaasiga ah:
Taageerada dhaqaale ee nolosha aasaasiga ah waa lacag uu qofku heli karo, haddii aanu meel kale lacag ka helin.

TE-toimisto

– XAFIISKA SHAQADA IYO XOOGSASHADA:
Xafiiska shaqada iyo xoogsashada waxaa laga helaa adeegyada la xiriira shaqada, sida tusaale ahaan siinta talooyinka la xiriira sida shaqo loo raadsado.

TULKKAUS – TURJUBAANID:
Turjubaaniddu waa luuqad ama farriin ayaa loo turjumayaa luuqad kale ama qaab la fahmi karo.

tulkki – turjubaan:
Turjubaanku waa qof xirfadle ah oo caawiya, haddii qofka macaamiisha ah aanu aqoon luuqad ku filan oo danihiisa ku dhammaysan(fushan) karo.
Tusaale ahaan qofka shaqaalaha ah hadalkiisa ayuu turjubaanku ugu turjumi karaa qofka macaamiisha ah luuqaddiisa.

tulkkipalvelu – adeegga turjubaanka:
Adeegga turjubaanku waa adeeg lagu helo turjubaanno.

TURVAKOTI – GURIGA AMMAANKA:
Guriga ammaanku waa meel nabadgelyo ahaan loo tegi karo, haddii qoyska dhexdiisa uu ka jiro dagaallan. Guriga ammaanka waa la aadi karaa, hadday guriga ka jirto halis ah in dagaallan imaan karo.

VAITIOLOVELVOLLISUUS

– WAAJIBAADKA XOG-XAFIDIDDA:

Waajibaadka xog-xafididda macnihiisu waa shaqaalaha maamulka looma oggola inay cid kale u sheegaan qofka macaamiisha arrimihiisa.

VAMMA – NAAFO:

Naafada macneheedu waa qofku wuxuu leeyahay wax muddo dheer xadidaad ku samaynaya oo hoos u dhigaya awoodiisa waxqabasho.

Naafadu waxay noqon kartaa mid jir ahaaneed, mid nafsad ahaaneed ama mid caqli ahaaneed ama waxay noqon kartaa mid dareemada la xiriirta.

synnynnäinen vamma – naafo cillad maskaxeed(shoog) ka soo jeedda:

Naafada lagu dhashay waa naafo uu qofku ku dhashay.

traumaperäinen vamma – naafo cillad maskaxeed(shoog) ka soo jeedda:

Naafada cilladda maskaxda ka soo jeeddaa waa naafo qofka wax ku dhacday wakhti noloshiisa ka soo gaartay, tusaale ahaan shil.

VAMMAINEN HENKILÖ – NAAFO:
Naafo waa qof naafo ah oo leh naafo jir ahaaneed ama mid nafsad ahaaneed ama caqli ahaaneed ama leh naafo dareemada la xiriirta.

kehitysvammainen henkilö
– naafada horumarka garaadka:
Naafada horumarka garaadku(caqliga) waa qofka naafadiisu tahay xagga horumarka garaadka(caqliga) oo ay ku adag tahay inuu wax barto ama wax fahmo.

liikuntavammainen henkilö – curyaan:
Curyaanku waa qof leh naafo xadidaysa socodka.

sokea tai näkövammainen henkilö – naafada aragga:
Naafada araggu waa qof leh naafo aragga xadidaysa.

kuuro tai kuulovammainen henkilö – naafada maqalka:
Naafada maqalku waa qof leh naafo xadidaysa maqalka.

VAMMAISPALVELUT – ADEEGYADA NAAFADA:
Adeegyada naafadu waa adeegyo loo qabanqaabiyo dadka naafada ah. Adeegyada naafadu waxay ka mid yihiin daryeelka arrimaha bulshada.
Ujeeddada adeegyada naafada laga leeyahay waa in qofka naafada ah uu dadka kale bulshada si sinnaan leh ugula noolaan karo oo wax ula qabsan karo.

VAPAAEHTOINEN – ISKII WAX U SAMEEYE:

Iskii wax u sameeye waa qof rabitaan uu isagu rabo darteed wax u sameeya.

Erayga macnihiisu wuxuu kaloo noqon karaa in waxa la samaynayaa aanu khasab ahayn.

Waxbarashada ka qayb qaadashadeedu khasab ma aha.

vapaaehtoistyö – shaqo iskaa wax u qabso ah:

Shaqo iskaa wax u qabso ah waa shaqo aan mushahar lagu qaadan.

VALITTAA – KA CABASHO:

Ka cabashada macneheedu waa qofku wuxuu dalbanayaa in la beddelo ama la saxo go'aan aanu ku qanacsanayn oo shaqaalaha maamulku gaaray.

valitus – cabasho:

Cabashada macneheedu waa dalbasho sixitaan oo qofku wuu dacwoonayaa, haddii uu ku qanci waayo go'aan shaqaale maamul gaaray.

Cabashada waa in qoraal ahaan loo sameeyaa.

valitusoikeus – xuquuq cabasho:

Xuquuqda cabashada macneheedu waa qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu dalbado in laga beddelo go'aanka aanu ku qanacsanayn.

VELVOLLISUUS – WAAJIBAAD:

Waajibaadku waa arrin ama waxqabad ay waajib tahay in la sameeyo tusaale ahaan sharciga oo sidaas dhigaya darteed.

Finland waxaa ka jira waajibaadka guud ee gelidda gurmadka – ciidanka.

Taas macneheedu waa ragga da'doodu u dhaxayso 18–6o sano waxaaa waajib ku ah inay ka qayb qaataan difaacidda Finland.

VERO – CANSHUUR:

Canshuurtu waa lacag khasab ah oo la siiyo waddanka ama degmada.
Qof walba si otomaatig ah ayuu canshuur uga bixiyaa mushaarkiisa iyo dakhliyada kale ee soo gala.
Hase yeeshee taageerooyinka dhaqaale qaar baa canshuur la'aan noqon karaan. Tusaale ahaan lacagta taageerada naafada canshuur lagama bixiyo.

verovähennys – canshuur dhimid:
Canshuur dhimidda macneheedu waa qofku wuxuu bixinayaa canshuurta caadiga ah canshuur ka yar.

Qofku hadduu soo buuxiyo shuruudaha loo baahan yahay wuxuu helayaa canshuur dhimid.

Haddii qofka lagu leeyahay deyn uu guri ku gatay, deynka dulsaarkiisa canshuurta ayuu ka goyn karaa.

VERTAISTUKI – TAAGEERO ISU DHIGANTA:

Taageerada isu dhiganta macneheedu waa qofku ama qoysku wuxuu taageero ka helayaa dad ama koox waayo-aragnimo u leh xaalad nololeedka uu qofku ama qoysku ku jiro oo kale.

VIITTOMAKIELI – LUUQAD TILMAAMEED:

Luuqad tilmaameedku waa luuqad ku hadalkeedu yahay tilmaamo iyo faro ka hadal. Sida caadiga ah luuqad tilmaameedka waxaa isticmaala dadka dhegaha la' ee aan maqal hadalka.

VIRANOMAINEN – MAAMUL:

Maamulka waxaa loola jeedaa hay'ad ama waax fulisa hawlaha qaranka ama degmada.

Hay'adda Hawlgabka Qaranka – Kela waa maamul.

VÄKIVALTA – DHIBAATAYN:

Dhibaataynta waxaa loola jeedaa waxyeello jir ahaaneed ama mid nafsad ahaaneed oo qof kale loo geysto.

henkinen väkivalta – dhibaatayn nafsad ahaaneed:
Dhibaataynta nafsad ahaaneed macneheedu waa in qof laga dhigo mid aan waxba ahayn oo la yaso ama la aflaggaadeeyo. Tusaale ahaan in qof la caayaa waa dhibaatayn nafsad ahaaneed.
Waxaa iyana dhibaatay nafsad ahaaneed ah, in qof loogu hanjabo in dhibaatayn jir ahaaneed loo geysanayo.

fyysinen väkivalta – dhibaatayn jir ahaaneed:
Dhibaataynta jir ahaaneed macneheedu waa in qof waxyeello jir ahaaneed loo geysto.

lähisuhdeväkivalta
– dhibaataynta qof xiriir dhow lala leeyahay:
Dhibaataynta qof xiriir dhow lala leeyahay macneheedu waa qof qoyska ka mid ah ayaa si dagaallan leh ula dhaqmaya qof kale oo ay isku qoys yihiin.

parisuhdeväkivalta
– dhibaataynta xiriirka lammaanaha ah:
Dhibaataynta xirrirka lammaanaha ah macneheedu waa qof ayaa qofka ay xaas ahaanta isu yihiin si dagaallan leh ula dhaqma.

YHDENVERTAISUUS – SINNAAN:
Sinnaanta waxaa macneheedu waa dadka oo dhan waa isku qiimo, waxay leeyihiin xuquuq nololeed oo isku mid ah.

Sharciga hortiisa dadka oo dhan way siman yihiin, taas oo macneheedu yahay dadka si isku mid ah ayaa loola dhaqmaa.

YHTEISKUNTA – BULSHO:
Bulsho waxaa loola jeedaa dad dhul gaar ah deggan. Bulsho waxaa noqon kara waddan xor ah sida Finland. Bulshada waxaa ku nool dad, waxaana ka jira beelo kala duwan oo wax is weydaarsi ka dhexeeyo. Bulshadu waxay leedahay nidaamyo ay u shaqayso iyo hadafyo ay tiigsato.

Adeegyada bulshada Finland leedahay kharashka ku baxa waxaa laga bixiyaa canshuurta soo xeroota.

VAMMAISFOORUMI
Vammaisjärjestöjen yhteinen ääni